SADDEX DOQONIINOO ISBARKAN! (Sheeko)

Intaan dhaqammo shisheeye nasoo gelin, dhaqanka reer guuraaga Soomaalidu wuxuu ahaan jiray mid aad u milgo iyo qurux badan, gaar ahaan dhaqanka guurka iyo dadabgalka(1) u gaarka ah, siiba marka labo ruux oo dhallinyaro ah doonayaan inay reer yagleelaan oo is guursadaan. Arooska iyo aroosaddu uma baahnaan jirin inay la yimaadaan mood(2) iyo nool(3) ay guri ku dhigtaan.

Labada is doortay waa loo xoologoyn(4) jirey, waxaa aqalkooda, agabka(5) guriga iyo weliba xoolaha ay u baahan yihiin inay nolosha ku bilowdaan u qaabbilsanaa reeraha ay kasoo kala jeedaan. Markii lasii kala qaado, aqalka iyo agabkiisa waxaa ku faro yaraysan jirey, oo weliba halkaas kusoo bandhigi jirey farsamadoodi ugu danbaysey dumarka reerka gabadhu ka dhalatey. Yaradka(6) iyo gabbaatiga(7) waxaa bixin jirey reerka wiilku ka dhashay, Xoolaha kala duwan ee ari iyo ishkin(8) iyo weliba awrkii gurgur(9) ee ay raran lahaayeen waxaa usoo kaalayn(10) jiray reerka wiilka, hadde dhibaaddana(11) waxaa qaabilsanaa gabadha reerkooda.

Intaas markaan halkaas uga gudbo, waxaan haddana idinku jalbeebinahayaa(12) sheekada cinwaanka kore ku xusan, oo la xiriirta dhaqanka kaalada (tabantaabo).

Beri baa sidii ay ahaan jirtey, wiil dhallinyaro ah guur maagay, kaddibna reer ay xigto yihiin oo meel durugsan yaalley ayuu kaalo u doontay. Markuu reerkii u tegey una sheegtay ujeedkiisii, waxay soo siiyeen neef ari ah oo ri' ah.

Subixii xigey, goor hore ayaa wiilkii oo ri'diisii wata halkaas kasoo ambabaxay. Sidaan horey usoo sheegnay dhulku waa kala durugsan yahay, waxaana labada degsiimo u dhexeeya dhul omos(13) ah oo waaqle(14) ah, oo aan habar dugaag(15) mooyee cidina ku noolayn, wuxuu damacsanaa inuu inta maalinnimadaa dhulkaas ka tallaabo, oo weliba hadduu ugu dheereeyo ri'duna si fiican ugu socoto, cidaha ugu degsiimada sokeeya fiid danbeedkii isku beego si uu ugu sii hoydo.

Maalinnimadaas ri'dii si fiican ayay ugu socotay, balse markii qorraxdii sii gabaabsiday, welina dhulkii cidla ciirsi la'da ahaa ay jafayaan, ayaa ri'dii dhulka fariisatay oo tiri 'xaggana uma socdo, xaggaasna uma socdo', waana markii socod dhab ah loogu baahi badnaa oo aaskii soo madoobaaday. Mar ri'dii buu qaadaa oo deegta u ritaa, marna waa jiidaa, haba sheegin!. Wuxuu is yiri malaha reerku ri'da dhego adaygaan way ku yiqiinneene ogaan bay kuu siiyeen, markaasuu wuxuu soo gocday maahmaahdii ahayd, "dago ari ninkii weydiinteeda kugu dhiba wadisteedaa lagu dhibaa!"

Isagoo ka yaabban wuxuu sameeyo oo sidistii iyo jiidistii ri'da ku daalay, ayaa wuxuu arkay muddul cidla ah, oo malaha beri hore laga guuray, balse dhismihiisu fiican yahay oo weliba albaab leh. Wuxuu talo ku gaaray in isagiyo ri'diisu caawa muddulkaan nabadgalaan. Sidaas ayuu yeelay, kaddibna muddulka albaabkiisa ayuu hoosta ka qataartay, ri'diina tiir dhexaadka muddulka xarigga ugu adkeeyey, oo isagiina halkiisa dug yiri.

Habeen barkii ayaa ninkii kaadi qabatay oo soo kacay, albaabkii ayuu inta iska furay qaddar qiyaastii 1 km. socday, isagoo is leh kortaggaaga(16) fogee. Balse, wuxuusan ogayn in caaway oo dhan libaax raadkiisa soo goobayey, oo markuu ogaaday raadkuu gurayey inuu muddulkaan ku jiro uu aqalka gadaashiisa ugu dhuuntay. Markii uu ninku kor tagey, ayuu libaaxii muddulka u daba maray, oo ri'da inta dhufsaday iskama tagine, wuxuu talo ku gaadhay inuu mugdiga ugu dhuunto si uu ninka iyo ri'daba iskugu darsado oo u cuno.

Ninkii oo kortaggiisii kasoo laabtay, oo aan war u hayn libaaxa mugdiga gudaha guriga ugu dhuuntay, ayaa sidiisii albaabka qataarka ka gashaday. Markuu is yiri seexo ayaa libaaxii inta kusoo booday ninkii halkaas ku dilay, markuu libaaxii ninkii cunay ayuu ri'diina ku daray, balse wuxuu hadal ka joogaa, oo uusan libaaxu ka fekerin ciddii albaabka ka furi lahayd, illeen libaax albaab sida laysaga furo ma yaqaane. Halkaasuu libaaxii oohin iyo reen la fariistay 'nawww nawww nawww'.

Beelihii arladaas dad ugu soo xigay, ayaa waxay isweydiiyeen 'war libaaxaan halka meel uun ka ciyaya, tolow ma dabin buu galay'. Raggii beeshu waxay yiraahdeen aan ka war doonno, kaddibna warmahooday soo gurteen oo ci'dii libaaxa soo raaceen, muddulkii uu ka ciyayey ayay isa soo dul taageen, intay dhistii uu muddulku ka samaysnaa meelo ka fiiqeen ayay halkaa warmihii dululaatiga(17) darandoorri(18) uga soo gasheen, oo ay libaaxii bartaa ku dileen.

Dulucda Sheekada:

1. Ri'dii doqonta ahayd oo maalintii oo dhan ordaysay, oo goortii gabbalkii dhacay oo in la guureeyo iyo socod loogu baahi badnaa diidday inay dhanna u socoto.
2. Ninkii doqonka ahaa oo isagoo cidla ciirsila jooga kortaggiisa fogeeyey, bal muu arladoo dhammi waa wada cidlee meeshiisa u kortago.
3. Libaaxii doqonka ahaa oo isagoon ka fekerin siduu albaabka isaga furi lahaa, keliya ka fekeray siduu ninka iyo ri'da isugu darsan lahaa.

Waa saddex doqoniinoo isbarkan!

Cudur Daar: Waxaan ka cudur daaranayaa in sheekadu si laga naxo ku dhammaatay, waanna garwaaqsanahay in dad badan xasaasiyad ka qabi karaan arrintaas, waan idinka raalligelinayaa, balse anigu ma curin sheekadaan ee waa mid ka mid ah sheekooyinka dadka Soomaaliyeed jiilba jiil usoo gudbiyey, waana siday aniga igu soo gaadhay intaan aniga qudhayda xasaasiyaddu i gelin!.

*Waxaan ka dheegtay(19) oo ka qoray abwaan Xassan Sheekh Muumin (AHN), Wixii khalad qoraalka la xiriira waa xaggayga, waxaanse diyaar u ahay in laygu biiriyo wixii aqoon iyo ogaal ah, waanna idiinkaga gallad hayn doonaa. Akhris Wanaagsan!

Abdullahi Yasin Hassan
info@puntish.com

MACNAHA ERAYADA:

(1) Dadabgal – aqalgal ama aroos.
(2) Mood – lacagta; maalka sarrifan.
(3) Nool – xoolaha nool
(4) Xoolo Gooyo – In xoolaha qaar loo gooyo, wax laga siiyo.
(5) Agab – qalab, alaab, wixii guriga gudihiisa lagu isticmaali lahaa.
(6) Yarad – xoolaha hablaha laga bixiyo marka la guursanayo oo reerkeeda la siiyo, waxaana bixiya wiilka aroosanaya reerkiisa, aalaaba waa boqol geel ah, oo la raacin karo baarqab geel, faras, buntukh, kwd.
(7) Gabbaati – waa sooryo, sharfid, waxaa lagu bixiyaa goobta weydiisiga gabadhu ka dhacayo, waxaana leh dumarka reerka gabadha oo hooyadeed ugu mudan tahay iyo ragga goob joogga ka ah weydiisiga, khaasatan gabadha ilma adeerradeed.
(8) Ishkin – waa xoolaha la dhaqdo marka ariga laga reebo, waa geela, lo'da iyo fardaha; gammaan.
(9) Gurgur - waa awr hayin ah, xoog weyn oo la rarto markii la guurayo.
(10) Kaalo – waa neef ari ah; waa xoolaha la siiyo reerka cusub ee guursanaya, siiba ariga, si ay nolosha ugu bilowdaan.
(11) Dhibaad – waa hadiyad sharafeed gabadha la soo siiyo markay reerkooda soo booqadato, oo ay gurigeeda kula laabato, si ay ninkeeda iyo carruurteeda ula wadaagto.
(12) Jalbeeb – la wadaagid sheeko xallad iyo xiiso badan; tebin.
(13) Omos – meel aan baad iyo biyo lahay; abaar; qalayl, engegan.
(14) Waaqle – cidla', aan dad iyo duunyo toonna lahayn.
(15) Habar Dugaag – Bahalaha hilib cunka ah, oo xayawaanka kale iyo dadka cuna.
(16) Kortag – xaajood; masaafo dadku u qashinsaar tagaan.
(17) Dululaati – dal dalool; joogto.
(18) Darandoorri – isdaba joog, aan kalago' lahayn; halaasi; boobsiis; gaardis.
(19) Dheegasho- waxaan kasoo dhegadhegeeyey; maqlay.